Waxaad taako taako iyo dhudhun dhudhun

Abii Saciid Alkhudr Allaha ka raali ahaadee waxaa laga wariyey yiri: Rasuulka Ilaahay nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu yiri: "Waxaad taako taako iyo dhudhun dhudhun u raacaysaan dariiqii ay jideeyeen kuwii idinka horeeyey, xataa haday galaan god abeeso lugaley waad raacaysaan" waxaan ku niri: Rasuulka Ilaahayow ma yuhuud iyo nasaaraad u jeedaa? wuxuu yiri: " yaa kale?".

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Rasuulku-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu sheegay sida uu noqondoono xaalaka ummaddisa qaar ka mida waqtiga uu joogo ka dib, taaso ah inay ku raacidoonaan Yuhuuda iyo Nasaarada caqiidadooda, camalkooda, caadadooda iyo dhaqankooda raacid aad u daran oo taako taako iyo dhudhun dhudhun ah, xataa hadii ay galaan god abeeso lugaley ay ka daba galayaan.

http://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/3355